



Qaybinta iyo Dayactirrada Kombiyuutarda khromebook -ga

9 ka-Abriil, 2020

Qoysaska Dugsiyada Magaalada Columbus ee u baahan Kumbuyuutarada Chromebook-ga waxay balan ka samaysan kartaa si ay uhelaan kombuyuutar, Xarunta Dhexe ee Diiwaangelinta Central Enrollment (430 Cleveland Ave., 43215). Degmadu waxay deymintaa doontaa laba kombuyuutar guri kasta. Laga bilaabo Arbacada, Abriil 15-keeda, Qoysasku waxay wici karaan (614) 365-6471 inta u dhexeysa 9:00 a.m. iyo 3:00 p.m. si ay u sameysataan balan. Chromebook-ga waxaa lagu bixin doonaa balanta, Talaadada, 21 ka-Abriil, illaa Sabtida, 25 ka-Abriil, inta u dhexeysa 9:00 a.m. iyo 3:00 p.m. iyo xarunta Dhexe ee Isdiiwaangal (Central Enrollment).

Dayactirrada khromebook-ga

Ka saaridda ciladaha iyo dayactirka Chromebook-ga, Qoysasku waxay wici karaan IT Helpdesk (614) 365-8425. Xafiika Helpdesk ayaa go'aamin doona, haddii balan lagu dayactirayo loo baahan yahay iyo in jadwal balan ah la sameysanayo. Dayactirrada ayaa lagu dhammeyn doonaa Xarunta Macluumaadka Dhexe ee Kingswood Data Center (1091 King Ave., 43212) maalmaha Talaadada inta u dhaxaysa 10:00 a.m. iyo 1:00 p.m.